



U wareegidda fasalka 7aad

Helsinki

Arday kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu galo iskoolka isaga u dhow ama uu ku sii wato waxbarashada iskoolkiisa dugsiga dhexe ah ee isku jira.

Taariikhyaada muhiimka ah

26.10-15.11.2020 Iskooladu waxaay qabanqaabin karaan munaasabado ogaysiis ah. Munaasabadahaas waxaa fiiro gaar ah loogu yeelanaya korona fayruska dartii hagitaanadda badbaadada iyo nadaafadda ee jira iyo in goobta lagu dhigayaa ay tahay mid waasac ah. Munaasabadahaas wakhtiyadooda waxaa laga heli karaa websaydyada iskoolada.

16.11.-15.12.2020 Wakhti dalabka ah ee waxbarista awoodda la saaray iyo ta labada luqadood ah. Waxbarista awoodda la saaray iyo tan labada luqadood ah waxaa lagu dalban karaa foom Wilma-da ku jira. Iskoolka ayaa foomkaas soo ogaysiinaya ardayda waalidkood.

Salaasada 15.12.2020 waa foomkaas maalinta u dambaysa ee Wilma-da lagu soo celin karo.

14.1.-17.12.2021 Waxaa jira imtixaanadda ku habboonaanta waxbarista awoodda la saaray iyo tan labada luqadood ah.

Arbacada 19.3.2021 Go'aamadda ardayda ayaa boostada loogu dirayaa.

Jimcaha 2.4.2021 Waalidku waa in uu si qoraal ah u soo ogaysiyyaa 2.4. ugu dambayn haddii aanu booska qaabilaynin.

Haddii ardaygu uu ku qaabili waayo imtixaanka ku habboonaanta / ama si kale goobta waxbarashada booska waxbarashada ee uu ka helay, waa in uu waalidku soo ogaysiyyaa iskoolka booska waxbarashada u soo bandhigay iyo maamuumalaha iskoolka ardayga u dhow.

Haddii ardaygu uu ku heli waayo booska waxbarashada imtixaanka ku habboonaanta / ama si kale, waa in waalidku uu soo ogaysiyyaa iskoolka u dhow.

Dalbashada waxbarista awoodda la saaray iyo tan laba luqadeedka ah

Iskoolada Waxbarista awoodda la saaray iyo ta labada luqadood ah waxaa lagu dalban karaa foom Wilma-da ku jira muddada u dhaxaysa 16.11.-15.12.2020.

In qofka loo doorto waxbarista awoodda la saaray ama tan labada luqadood ah waxaa ay qofka dalbanaya kaga xidhantahay in uu ka qaybqaato imtixaanka ku habboonaanta. Imitixaanaadka ku habboonaanta waxaa la qabanqaabiyyaa 14.1.-17.2.2021. Imtixaanadda ku habboonaanta waxaa loo galayaa iskoolka uu ardaygu ugu horrayn dalbaday. Isla imtixaankaas waa suuro gal ardaygu in uu ku dalbado iskooladda kale ee isku awoodda loo saaray waxbarista ama bixinaya waxbarista labada luqadood.